

## **Nidaamka aastaamaha jirada iyo qaboobaha carruurta ee dugsiyada iyo xarumaha daryeelka ee taageero dugsiyada iyo qoysaska**

Gudaha Maars 2021, Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Dadweynaha (BAG), oo kaashanayo "pädi-atrie schweiz", ayaa dib u eegay sharuuda tijaabada ee carruurta iyo qaangaarada. Tani waxay saameysay nidaamka ay hormariyeen DVK, taas oo qeexo nidaamka jirooyinka iyo aastaamaha qabowga ee carruurta iyo qaangaarada dugsiga iyo xarumaha daryeelka ee siyyaa daryeel dheeraad ah dugsiga iyo qoyska. Marka laga eego qaboobaha iyo xiliga samboorka soo socdo, hagida ku lifaaqan waxaa loogu tallogalay inay siiso waaladiinta iyo dugsiyada warbixinta ee sida loo sii wado markii aastaamaha qabowga dhacaan. Nidaamka ku lifaaqan waxaa lagu sameeyay iskaashiga BAG iyo sida ku saleysan xaalada hadeer ee cilmiga ee faafida fayrasyada carruurta.

### **Nidaamka loogu tallogalay carruurta ka weyn 6 sanno jirka**

Wixii carruur iyo qaangaarada ka weyn 6 sanno jirka, isla sharuuda caafimaadka ayaa hadeer quseeyo dadka weyn. Haddii aastaamaha waafaqsan COVID-19 ay dhacaan, canuga ama qaangaarada waa inay joogaan guriga oo uu baaro dhaqtarka. Haddii baaritaanka laga helo, gooniyeen ayaa la tilmaamay. Haddii baaritaanka laga waayo, canuga ama qaangaarka ayaa ku ahaado qandho la'aan guriga oo 24 saacadood (fiiri jadwalka socodka ku lifaaqan gadaal).

Sabab la xiriirto nidaamka sahlan, ma jiraan baahi jadwalka oo gooniga ah ee dugsiga hoose iyo sare.

### **Nidaamyada carruurta ka hooseeyo 6 sanno jirka**

Nidaamka carruurta aastaamaha leh ee ka hooseeyo 6 sanno jirka aad ayay uga duwanyihii. Halkaan, xisaabta ku lifaaqan ayaa u adeegto sida hagida iyo jaheynta. Waxa ugu muhiimsan halkaan waa:

- Carruurta qabto xaalada liidato ee guud ee leh ama aan laheyn bilowga cusub ee qandhada ee ka sareyso 38.5° ayaa guriga joogayo. Waaladiinta ayaa la xiriirto dhaqtarka ka soo qeygalayo. Haddii dhaqtarka uusan sameynin ogaansho ka duwan, baaritaanka waa in la sameeyaa. Haddii natijada baaritaanka laga waayo, canuga wuxuu ku laaban karaa dugsiga 24 saacadood kadib isagoo aan haddii aan qandho lahayn.
- Carruurta qabto caafimaadka guud ee wanaagsan waa inay kowdii joogaan guriga haddii uu ku dhaco qufac cusub, daran ama qandho ka sareyso 38.5°. Haddii canuga muujiyo aastaamaha COVID-19 ee kale, dhaqtarka waa in lala tashtaa iyo - haddii aysan jirin baaritaano kale ee la helayo - baaritaan waa in la sameeyaa.
- Haddii qandho ama qufac daran sii jirto sadex maalmood ama ka dheer ama haddii kale xaalada guud wanaagsantahay oo aysan jirin aastaamo kale, dhaqtarka waa in sidoo kale lala tashtaa iyo - haddii baaritaano kale aan la heli karin - baaritaanka waa in la sameeyaa.
- Qabowga iyo/ama dhuun xanuunka leh/aan laheyn qufaca dhexaadka ah laakin aan jirin qandho uma baahno ka reebida dugsiga/xarunta daryeelka ama baaritaanka haddii uu leeyahay caafimaadka guud ee wanaagsan.

Xisabata ku lifaaqan waxay qeexseysaa nidaamka loogu tallogalay carruurta aastaamaha leh < 6 sanno jirka ah. Waa in la ogaadaa in baaritaanada sidoo kale lagu sameyn karo carruurta aan aastaamaha leheynt oo da' walba ah sida ka qeyb ah baaritaanka dilaaca cudurka ee dugsiga ama xarunta daryeelka.

"Pädiatrie schweiz" ayaa ka howlgasho «[www.coronabambini.ch](http://www.coronabambini.ch)», aalada onleenka ee adeegsato weydiinta qaabeysan ee ku caawiyo waaladiinta inay carruurta jiran ku qiimeeyaan aastaamaha carruurtooda oo go'aansado haddii uu aadi karo ama uusan aadi karin canuga dugsiga. Aalada si joogta ah ayaa loo cusbooneysiyyaa waxay ku xirantahay xaalada xakameyn ta cudurka. Kani waa adeeg dhameystiran oo waaladiinta ay doorbidi karaan oo adeegsan karaan.

Shirka Iswiisarlaan ee dadka af jarmalka ku hadlo ee Xafiisyada Dugsiga Hoose (DVK), 15.10.2021